



Xogta Waalidka ee FMPSD: Qiimaynta Shaqada ardayga iyo Warbixinta Darajooyinka ugu dambeeyaa FAQ's

Ujeedada:

- In la dejijo hagitaanno cad oo joogto ah oo loogu talagalay warbixinta inta lagu jiro xaaladda COVID 19.
- Kuxirida tilmaamaha FMPSD ee ku saabsan warbixinta iyo Alberta Education oo ay ku wehelinayso walaac iyo faham ku saabsan baahida loo qabo in si caddaalad ah loola dhaqmo ardayda iyo wanaaggaa ardayda, qoysaska iyo shaqaalaha.

Guudmarka Waxbarshada Alberta (Alberta education) iyo aasaaska:

- Fasalada dugsiga mise iskuulka Alberta ayaa la baajiyay bishii Maars 15, 2020
- Maamulka iyo masuuliinta dugsiga ayaa fidiya fursado waxbarasho guriga dhexdiisa ah oo loogu talagalay Kindergarten ilaa ardayda Fasalka 12 ah khadka tooska ah, koorsooyinka oo lagu bixin doona teleefonka iyo wadahadalka fiidiyowga.
- Macallimiintu waxay go'aaminayaan casharada aasaasiga ah waxayna qorsheenayaan casharro macquul ah oo loga shaqayn karo guriga.
- Waxbarashada Alberta waxay joojisay dhamaan Qiimeyn Degmooyinka fasalada 6, 9 iyo 12.
- Fadlan tixraac Tilmaamaha Waxbarashada ee Alberta ee gaarsiinta ku jira [halkan](#)

Tilmaamo:

- Ardayda waxa la siinaya casharro aassaasi ah oo laga maarmiin si ay ku guuleystaan fasalka xiga.
- Macallimiintu waxay dejieen oo ay la socodsiiyen habab cad oo loogu talagalay ardayda iyo qoysaska si ay ula xiriiraan macallimiinta si toos ah. Ardayda waxaa la ogaysiin doonaa qaabka ay manhajkooda noqon doono.

FAQ's (su'aalo):

1. Iskuulka ma la joojiyay? Maya. Macallimiintu wali waxay qorsheynayaan oo ay wax bari doonaan ardayda. Ardayda waxaa la siinaa casharada aasaasiga ah oo laga maarmaanka ah ee looga baahan yahay in ay ku guuleysto fasalka xiga ama koorsada.

2. Sidee buu wiilkaygu / gabadhayda / nafteyda ula xiriiri macalinka? Macallimiintu waxay dejieen oo ay hirgeliyeen Hab cad oo isgaadhsii ah si ay ardayda iyo qoysaska ula xiriiraan macalinka oo u wada hadlaan si toos ah. Ardayda waxaa lagu caawin doona qaabka oo manhajka noqon doono. Wax ku barashada guriga way adkaan kartaa, macallimiinteenu waxay ku dalaali doonaan inay noqdaan kuwo is bedbeddeli kara oo la qabsan kara xaalada inta ay kari karaanna ku caawiyaan ardayda.

3. Sidee ardaydu ula qabsan doonaan casharadaas aan la barin? Qeyb ahaan iskuulka, waxaan la shaqeynay mas'uuliinta si aan u qorsheyno istiraatijiyyad lagu wajahayo wixii waxbarasho ah ee ka maqan ardayda marki ku noqdaan fasalka.

4. Sidee bay macallimiinta u darajyn doonaan ama u qiimeyn doonaan waxbarashada guriga? Macallimiintu waxay mas'uul ka noqon doonaan qiimeyn horumarka ardayga iyo ka warbixinta horumarkooda oo ay ku jiraan iyo meeleynta fasalka ugu dambeeyaa. Macallimiintu waxay had iyo jeer bixin doonaan jawaab-celin ku saabsan shaqada ardayga si loo hubiyo inay fahamsan yihiin waxbarashada iyo casharada loo baahan yahay. Waaan aaminsanahay xirfadnimada macallimiinteeni iyo hoggaamiyeyaasha waxbarashada inay qiimeyn karaan horumarka ardaydooda, si walba u yahay jawiga waxbarashada lagu jiro, waxayna go'aaminayaan buundooyinka ugu dambeeyaa lagu qori doonta kaarka warbixinta natijoooyinka.

Fasalada K-6

Barashadu waa sii soconaysa sida ay amrtay Wasaaradda waxbarashada. Ardayda waxay fursad u leeyihii inay kor u qaadaan buundooyinka termiga labaad ee kaararka warbixinta natijjooyinka ku qoran hadi ay dhammaystiraan nashaadaadka barashada guriga una gudbiyaan macalimiintood

Dhamaadka sanad dugsiyedka ayaa soo dhowaanaya macallimiintuna waxay ku qori doonaan tilmaamaha guusha ardayda kaararka warbixinta natijjooyinka dhamaadka sanadka. Nashaadaadka barashada ee lagu dhammeystirey guriga lona soo gudbiyay macalimiinta waxay gacan ka geysan doonaan fahamka macallinka iyo caddeyn tilmaamaya sannadka dhameestirkiisa.

Termiga 3aad waxaa ku jiri doona keliya casharada aqoonta ee farbarashada luqadda iyo xisaabta (**Literacy and Numeracy**) casharada wax qabadka ah iyo isla xariirka ku jiro laguma daraayo (**Application and communication**).

Macallimiintu waxay adeegsan doonaan tusaha "UASC" oo macnaheedu yahay lama qiimeyn karo iskuulka wu joogsaday, dhammaan natijjooyinka Aqoonta ee aan la barin ama la qiimeyn waaye termiga 3xaad. Tan ayaa ah in waalidiinta iyo mas'uuliyiinta ay ogaadaan oo ay fahmaan casharada aan la barin ama aan la daboolin. Iaakiin sidoo kale macallimiinta sanadka soo socda si ay u ogaadaan waxa la qaadan termiga 3xaad.

Ka sokow farbarashada Luqadda iyo xisaabta, waxa la raacin doona kaarka warbixinta natijjada ee ardayda FMPSD qoraal muujinaaya xiritaanka iskuulka sababtuna ay tahay COVID 19 iyo in Kailya casharada aasaasiga uun la baray wixii ka dambeeyay maarso 15-keedi.

Xirfadaha Nolosha lama qiimeyn doono termigaan waxaana logu qori doonaa "UASC".

Kaararka Warbixinta natijjooyinka waxaa laga heli doonaa waalidka /ardayga try portal waxaana boostada loogu diri doona Juun 25-teeda.